Update No. 2 • Feb. 8, 2016

Waalidiinta/Masuuliyiinta Iskuulada Degmada 191 ee in Burnsville-Eagan-Savage

Marka sanad dugsiyeedka soo socdaa biloowdo Siteember 2016, barnaamijka Vision one91 awgiis iskuulada degmadeena waxay isku badalidoonaan siyaaba badan oo cajiib ah, qorshaheenu wuxuu degmada u astaynayaa inay buuxiso baahida waxbarasho ee ardayda manta isla markaana xaqiijiso haddafka " Ardaykastaa inuu Diyaar u Yahay Nolosha Dhabta ah." Macluumaadkaas oo aan halkaan kuugu soo qadimayno.

Dhacdooyinka Muhiimka ah

Barnaamijka **DiscoverBHS** waa hab si wayn wax loogaga baran karo isbadalada Dugsiga Sare ee Burnsville ayna ku jiraan dhabaha khibrada shaqooyinka, diyaargaroowga kuleejka lagu gali karo, iyo barnaamijka lagu magacaabo Chromebooks ee loogu talgalay ardayda dhamaantood. Barnaamij gaaban oo ay ku jiraan muxaadaro ardaydu soo jeedinayaan ayaa bilaabmaysa 6-da fiidnimo galabta talaadada ah ee Feebarwari 9, waxaana ku xigidoona rixlo iskuulka lagu soo indha-indhaynayo.

Barnaamijka **Tech Share Fair** wuxuu muujindoonaa macalimiinta iyo ardayda oo soo bandhigaya sida tacliinta teknoolajiyada loogu isticmaalo fasaladeena iyo siyaabaha ay u balaadhan karto sanadaha soo socda. Imoow Kambaska ardayda fasalada toban iyo labaad ay isugu yimaadaan ee Diamondhead Education Center, oo cinwaankeedu yahay 200 W. Burnsville Parkway inta u dhaxaysa 5 ilaa 6:15 galabnimo maalinta Khamiista Feebarwari 25.

Dhismaha:

- Dugsiga Sare ee Burnville, waxaad ku arki kartaa gidaaro kor u socda dhinaca galbeedka, koonfurta iyo bariga dhismaha.
- Dhismaha cusub ee ganacsiga baabuurta matoorada ku socota iyo dhismayaasha ee lagu daray BHS imminka waa cusub yahay waana la isticmaalaa. Ardayda fasalada maadooyinka heerkoodu aadka u sareeya ee baabuurta matoorka ku socota qaata waxaa caawiya macalim Russ Tesmer (bidix eeg) wuxuuna ku taageeraa diyaarinta meesha matoorada lagu baranayo – waa khibrad cajaa'ib leh oo shaqada dhabta ah ka tarjumaysa.
- Dugsiga Hoose ee William Byrne Elementary School ee ku yaal Burnsville waxaad ka helaysaa fasalo la qaadan karo waxaan meesha laga saarayaa kuwii (40+ jirka ahaa) oo dhisma cusub ayaa dhawaan bilaabanaya taas oo fasalada dheeraad ah iskuulka ku kordhinaysa.

Isku Barnaamijyada Dubaridka Dugsiga Sare ee Burnsville High School

Habkaan cuub ee lagu magacaabo Waddada Cad wuxuu mitalaa isbadal qotodheer wuxuuna ku mitalaa habka aan ardayda doonayno inay si qotodheer uga fakaraan una qorsheeyaan khibradooda la xiriirta dugsiga sare una diyaarsadaan mustaqbal ifaya. Barnaamijka waddada cad (pathway) wuxuu ahaan doonaa wadanah arimaha lagu hubinayo inay ardaydu kuleejada galaan, shaqooyin fiican helaan ayagoo nolosha dhabta ah diyaar u ah. Koorsooyin cusub oo laysku soo ururiyey oo ay ka buuxaan fursado badan oo cusub oo ay ardaydu dugsiga sare kaga baranayaan tacliinta ugu wanaagsan uguna ee ugu badan inta ay sanaddaha dugsiga sare ku jiraan.

Diyaarinta dugsiga hoose oo cusub

In ku dhow 900 dad gaaraya ayaa soo xaadiray habeenkii macluumaadka ee iskuulka ee bishii Janawari, si ay wax uga fahmaan fikrada cusub ee farxada leh ee lagu magacaabo [STEA3M] ee ka jira dhamaan sadexda iskuul ee dhexe. Sababtuna ay tahay hamuunta loo qabo barnaamijka STEM ee metacalf, oo ah barnaamij loogu talagalay ardayda fahmada/maskaxda badan ee ka jira iskuulka Eagle Ridge, iyo barnaamijka AVID ee diyaargaroowga kuleejka ee ka jira Nicollet, waxaan doonaynaa inaan isu gayno sadexda barnaamijba ee dugiyada dhexe ee cusub oo aan la midayno barnaamijka STEA3M: Sayniska, Teknoolajiyada, Injineerinka, Tacliinta Saraysa, Hindisaada, AVID iyo xisaabta. Maalinta 8-da xiisadood laqaadanayaa waxay ardayda siinaysaa fursado ay ku sahaminyaan maadooyin iyo dano dheeraad ah. Maalin dugsiyeedku waxay lahaandoontaa 20 daqiiqo oo dheeraad ah si loogu daro xiisada talagalyada oo diirada lagu saarayo diyaargaroowga kuleejada/shaqooyinka iyo arimoohada muhiimka ah.

Teknoolajiyada

- Ardayda Dugsiga Sare ee dhamaantood waxay helidoonaan Chromebooks oo u noqonaya aalad ay si shakhsi shakhsi ah wax uga bartaan sanadka soo socda. Aaladaan lagu magacaabo Chromebooks waxay leedahay meelaha teeb ahaanta loo garaaci karo waxaase kale oo la samayn karaa in la wareejiyo oo markaa ay shaashadu isu badasho mid taabashada ku shaqaysa. Wixii faahfaahin intaa ka badan waxaad ka eegtaa qorshaha teknoolajiyada ee degmada ee Gudoonka Waxbarashadu meelmariyeen bishii Juun ee lasoo dhaafay.
- Ardayda dugsiyada dhexe waxaa Chromebooks la siindoonaa sanad dugsiyeedka 2017 – 18.
- Ardayda dugsiyada hoose waxay Chromebooks isticmaalidoonaan maalintii marka ay iskuulka joogaan (waxayna xadi ahaan noqonaysaa in halkii xabo ay laba arday wadaagaan inta laga gaarayo sanad dugsiyeedka 2018 – 19) balse guryaha uma qaadandoonaan sida ardayda dugsiyada sare.
- Macalim cusub oo ku takhasusay siyaabaha loo sameeyo aaladaha lambarada ku shaqeeya ayaa ardayda caawindoona isla markaana sii balaadhindoona xirfadaha barashada teknoolajiyada ee ardayga dugsiyada hoose. Waxaan lahaandoonaa manhaj la qeexay oo saynis ah oo ay ardaydu baranayaan macalimiintooda fasalada caadiga ah. Saynisku wuxuu sii ahaandoonaa maado

muhiim ah oo ka jirta maadaama aan ardayda u diyaarinayno fursado culmiga saynska ah oo aan innaba caadi ahayn kuwaas oo ku jira barnaamijkayaga STEA3M ee dugsiyada dhexe iyo dugsiga sare ee Burnsville halkaas oo aanu dhisma ahaan ku darayno 50,000 fuudh oo laba jibaaran si aan u buuxino baahida cilmiga sayniska ee ardaydeena.

- ParentVue waa meel cusub oo interneedka ah oo waalidiinta loogu talagalay inay ka galaan macaluumaadka ilmahooda la xiriira sida buundooyinka ardayda oo interneedka laga fiiriyo, imaatinka iskuulka, talaalada iyo waxyaaba kaleba. PrentVue waa hab sahlan oo aad ula socon karto akhbaarta ilmahaaga ee maalin walba isla markaana aan kuugula soo xiriiri lahayn haddii ay xaalad degdeg ahi timaado.
- Habka cusub interneedka waxbarashadii lagu baranayo laguna maamulayo ee Schoology waxaa isticmaala tira sii kordhaysa oo macalimiin iyo arday ah. [waxaana loo yaqaan Schoology Information]

Habkaan wargalinta emailska waxaa weheliya oo aad la socon kartaa horumarka uu samaynayo barnaamijka Vision On91:

- Bogga interneedka, daawashada fiidyoowyaasha iyo waxyaabo kale oo dheeraad ah waxaana aad ka heli kartaa: www.isd191.org/vision191
- Isgaarsiinta arimaha bulshada: Facebook, Twitter and Instagram.
- Joornaalka degmada ee aad interneedka ka akhrisan karto [Isdiiwaan gali]

Thanks for your interest,
Joe Gothard, Ed.D
@joegothard